

SHARCIYADA QOLKA DHAR DHAQASHADA

- Qolka dharka lagu dhaqdo waxaa la isticimaali karaa wakhtiyada uu guddiga dadka dhismaha deggeni go'aamiyey inuu furnaado.
- Qolka dhar dhaqashada waxaa la ogol yahay, in lagu dhaqo qoysku dharkuu dhaqanayo oo keliya.
- Mishiinnada qolka dhar dhaqashada lama ogola in lagu dhaqdo katiifado (mishiinnadu way jabayaa, sababtoo ah katiifadaha qoyan culayskoodu aad buu u badan yahay).
- Qolka dharka lagu dhaqdo halkii marba hal wakhti oo keliya ayaa la ballansan karaa.
- Wakhtiga qolka dharka lagu dhaqdo laga qabsanayo hore ayaa loo sii qabsadaa, iyadoo lagu qorayo liiska wakhti ballansashada ee qolka yaalla. Liiska waxaa si cad loogu qoraa magaca qofka isticimaalaya iyo lambarka guriga uu deggen yahay.
- Haddii wakhti la ballansaday la rabo, in la baajiyo, waa in liiska wakhti fiican lagu qoraa in wakhtiga la baajiyey, si qof kale oo rabaa uu wakhtiga la baajiyey u ballansado.
- Haddii wakhtiga mishiinnada la balansaday bilowgiisa saacad barkeed ka soo wareegto, welina qofkii ballansaday aanu dhar dhaqashadiisa bilaabin, qofka ku xiga ee qolka dhar dhaqashada u baahan baa wakhtigaas isticimaali kara.
- Markuu wakhtigaagu kuu dhammaado waa inaad isla markiiba dharkaaga ka qaadataa qolka dhar dhaqashada.
- Dharku markuu qallalo waa in si dhakhso ah looga urursadaa qolka qallajiska, si uu qofka ku xigaa uu ugu qallajisto.
- Xasuuso inaad si gaar ah uga taxaderto nadaafadda iyo hagaagsanaanta qolalka dhar dhaqashada loo isticimaalo ee dhismaha. **Isticimaale walba waa inuu markuu wakhtigiisu u dhammaado xil iska saaraa nadiifinta qolalka dhar dhaqashada iyo mishiinada.**

Sharciyadan dadkoo dhan ka dhexeeya dhawridooduu qof walboo meesha deggeni dhiniisa saamayn kaga yeelanayaa, in meesha dhar dhaqashadu ahaato mid nadiif ah, oo dhar ku dhaqashadeedu tahay mid lagu qanco.

Haddii qof dhismaha ijaar ku deggeni, dhawri waayo sharciyadan, waxaa dhici karta, inuu lumiyo xuquuqdiisa isticimaalka qolalka dhar dhaqashada.